



Liiska Hubinta Codsiga SNAP

Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Kabka (SNAP) waa hindise [Waxda Beeraha ee Maraykanka \(USDA\)](#) ay maamusho [Waxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee \(TDHS\)](#) barnaamis kaasoo gargaar nafaqo u fidiya reeraha u qalma. Qoysaskan waxaa loo kala saaray iyadoo la eegayo xaaladdaha aqalka qoyska iyo daqliga soo gala. Aqalka qoyska

waxaa ku jira carruur iyo dadka qaangaarka ee shaqayn kara oo ay da'doodu ka yar tahay 60 jir oo aan iskood u shaqayn ee Warbixinta Caddaynta la Fududeeyay oo la aqoonsaday inay helaan manfacyada ilaa 12 bilood. Marka loo oggolaado SNAP kadib,

qoysaskan waxaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan Foomka Warbixinta La Fududeeyey si ay u sii wadaan helitaanka manfacyada SNAP. **Isticmaal liiska hubinta si aad ula socoto nidaamka SNAP iyo waqtiyada kama dambayska ah.**

1. Codsiga/arjiga soo Buuxi

Buuxista codsiga SNAP ayaa ah tallaabada ugu horreysa ee aad qaadayso si aad u hesho SNAP. Codsiyada waxaa lagu buuxin karaa qatka onlaynka iyadoo la isticmaalayo [Codsiga Kaalmada Qoyska ee qatka tooska ah \(Family Assistance Online Application\) AMA](#) waxaad soo gudbin kartaa codsi daabacan adiga oo soo [gelinaya](#) ama boostada codsiga ku soo diri kara. *Faahfaahinta ka fiiri eeg bogga 2.*

Aniga waxaan arjigayga oo buuxa aan soo gudbiyay taariikhdan:

2. Dhammaystir Wareysiga U-qalmitaanka

Talaabada labaad ee helitaanka manfacaha SNAP ayaa ah in la dhammaystiro waraysigaaga u-qalmitaanka. Shaqaalahaaga kiiska ee SNAP waa inuu kugula soo xiriiraa wareysiga 10 maalmood gudahooda markaad hesho **dhameystiray** codsi. Wareysiyada waxaa la qaadi karaa marka ugu horeysa ee lala xiriirayo shaqaalaha kiiskaaga ama taariikhda ballanta la qabto ee mustaqbalka sida waafaqsan xeerarka federaalka.

Waxa la iila soo xiriiray taariikhdan:
kiiska:

oo waxaa iila soo xiriiray shaqalahayga

Wareysigeygu wuxuu dhacay (ama wuxuu dhaci doonaa) taariikhdan:

Saacadda:

3. Soo gudbi Dukumentiyada Caddaynta

Tallaabadan saddexaad, waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad soo gudbiso dukumeenti caddaynta lambarkaaga soshal sekuuritiga, aqoonsigaaga degnaanshahaaga hadda, dakhligaaga, kheyraadkaaga, hoygaaga, iyo/ama kharashka nolasha/maciishadahaada kale. Dukumentiga caddaynta waxaa lagu soo gudbin kara adiga oo soo geliya [faylka soo gelinta](#), waqtiga ballanta la qorsheeyay, ama boostada ayaad ku soo diri kartaa. *Faahfaahinta ka fiiri eeg bogga 2.*

Waxaan dukumentigayga caddaynta aan soo gudbiyay dukumentiga taariikhdan:

4. Codsiga waa la socodsiiyay waa (la Ogolaaday ama waa la Diiday)

Marka haddii la dhammeeyo, codsigaaga, waraysigaaga, iyo caddayntaada arjigaaga waa dib ayaa loo eegi doonaa, waxaana lagugu soo wargelin doonaa oggolaanshaha ama diidmada manfacaha 30 maalmood gudahood. Xaaladda arjigaaga waxaad ka hubin kartaa markaad booqato apps.tn.gov/dhsc/ ama gasho [Koontada TDHS](#)

5. Buuxi Foomka Warbixinta La Fududeeyay

Qoysaska haysta shahaado 12ka-bilood ee "Warbixinta la Fududeeyay (Simplified Reporting)" ayaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan Foomka Warbixinta La Fududeeyay iyo caddaynta ku meel gaar ah. Caadiyan, tan waxay ku xiran tahay kala bar inta u dhaxaysa oggolaanshahaaga iyo taariikhda cusboonaysiinta. Foomkaaga iyo tilmaamaha la xiriirka waa inaad ku heshaa afar toddobaad ka hor wakhtiga kama dambaysta ah waxaana laga yaabaa inaad ku soo gudbiso dukumeentiyada loo baahan yahay fakis ahaan, dhanka qatka, boostada, ama ballan ayaad u qabsan kartaa. Ku guuldareysiga inaad dhamaystirto talaabadan waxay keeni doontaa joojinta dheefaha SNAP. *Faahfaahinta ka fiiri eeg bogga 2.*

Foomkayga warbixinta la Fududeeyay waxaa la iga rabaa taariikhdan:

Foomkayga taariikhdan

ayaan soo gudbiyay:



6. Cusbooneysiinta Codsiga (Ikhtiyaar)

Warbixinta La Fududeeyay ee Aqalka Qoysaska ee haysta Dib u Cusboonaysiinta 12-Bilood ayaa laga yaabaa inay cusboonaysiiyaan arjiga SNAP iyagoo buuxinaya codsiga cusboonaysiinta. Cusboonaysiinta waxay ku lug yeelan kartaa waraysi iyo dib-u-xaqiijin. Taariikhda dib u caddaynta ama cusboonaysiinta waa lagugu soo wargelin doonaa iyo shuruudaha soo gudbinta ee la xiriirta laba bilood ka hor wakhtiga uu dhacayo manfacyada SNAP. If you choose not to complete the renewal process, your SNAP case will be closed and benefits discontinued.

Manfacyada SNAP-kayga hadda wuxuu dhammaanayaa bishan:

Dukumeentiyada dib u cusboonaysiinta waxaa la iska doonayaa taariikhdan:

Soo gudbinta Codsigaaga SNAP:

Si aad u buuxiso codsiga SNAP booqo qatka onlaynka ee FAOnlineApp.dhs.tn.gov **AMA** soo buuxi arjiga oo daabacan oo soo gudbi

arjiga kama dambays: **1)** Arjigaaga oo dhammaystiran ku soo gudbinta qatka fileupload.dhs.tn.gov **AMA 2)** Boostada cinwaanka waa: Family Assistance Division Department of Human Services, P.O. Box 620001 Memphis

TN 38181. Booqasho tn.gov/humanservices/information-and-resources/ si aad u soo degsato oo loo daabacato codsiga ama la soo xiriir [Xafiiska TDHS ee deegaankaaga](#) si aad u hesho arjiga oo qooraal ah.

Caddeyn:

Waxaad haysataa saddex qaab oo aad ku soo gudbiso dukumentiga caddaynta: **1)** Caddaynta waxaa ku soo gudbin kartaa adiga oo isticmaalaya

qatka fileupload.dhs.tn.gov **2)** dukumentiga waxaad keeni kartaa xafiiska TDHS ee deegaankaaga adigoo ku imaanaya ballan la

laguu qabtay **3)** Adiga oo dukumentiga halkan ku soo dira: Family Assistance Division Department of Human Services, P.O. Box 620001 Memphis TN 38181.

Tusaale ahaan Dukumentiyada Loo isticmaalayo Caddayn ahaan waa:

- *Lambarka Badbaada Bulshada:* social security card
- *Aqoonsiga:* shatiga darawalnimada, aqoonsiga iskuulka oo leh sawir, Baasaboora, Kaarka Shisheeyaha ee Degnaanshaha, kaarka I-94, kaarka diiwaangelinta cod-bixiyaha
- *Caddayn Deganaanshaha Hadda:* heshiiska guri ijaar, biilka tamarta, biilka teleefoonka, ama shatiga darawalnimada oo ciwaanka hadda ku qoran
- *Dakhli iyo Hanti:* jeegga dabadiisa, warqadda loo shaqeeyaha, waraaqaha abaalmarinta
- *Kharashka guriga:* bixinta deynta guriga, canshuurta guryaha, ceymiska guriga, risiidka ijaarka, heshiiska kirada
- *Kharashka isticmaalka adeegyada:* biilka korontada, biilka biyaha, biilka gaaska

Goorta la soo Gudbinayo Foomkaaga Warbixinta ee La Fududeeyay ee loogu talagalay Caddaynta 12-ka Bilood ah

Aqalka qoyska ee qaba caddaynta 12-ka -bilood waa inay soo gudbiyaan foomkooda warbixinta la fududeeyay marka la gaaro lixda

bisha maraka barnaamijka SNAP loo ogolaado ka dib. Foomamka waxaa dadka SNAP qaata loo dirayaa afar usbuuc ka hor taariikhda soo gudbinta. Haddii aadan ogayn foomka halka aad dhigtay, Xarunta Adeegga Kaalmada Qoyska waxaad kala xiriiri kartaa adiga oo

ka soo waca 866-311-4287 iyo/ama TTY lambarka 711 si aad u hesho foom kale.

La Xiriir:

Qaabka la isaga warahyn karo oo aad ku hubinayso in manfacyadaada aad ku helayso ayaa ah in aad u soo sheegtaa haddii xogtaada adiga lagugu soo xiriirayo aad u soo sheegtaa



Department of

Human Services

Soo sheegid la Sahliyay

Dib u Cusboonaysiinta 12ka bilood

mar walba oo aad wax ka beddesho. Qaabka aad tan ku samayn karto waxaa ka mid ah adiga oo u soo maraa [Koontadaada TDHS](#) ama adiga oo la xiriiiraya ee Xarunta Caawinta Qoyska ee 866-311-4287.

Wax Dheeraad ah ka Baro Qatka Interneetka

Kaalayahayaga Qatka, Ava, ayaa laga heli karaa boggeena 24/7 si ay kuu siiso wixii jawaabbo ah ee aad u baahan tahay tn.gov/humanservices Fiidiyowyo, Su'aalaha Badanaaba La Isweydiyo (FAQs), iyo macluumaad kale oo ku saabsan TDHS

Barnaamijyada ayaa sidoo kale waxaa laga heli karaa iyada oo loo marayo TDHS maktabadda Illiha ee tn.gov/humanservices/information-and-resources.

Nagala Soco @TNHuman Services

Nagala soo xiriir baraha bulshada si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay ee dhacdooyinka iyo xogaha fiidiyowyo ku saabsan barnaamijyo badan oo TDHS ah oo ay ku jiraan SNAP.



Department of

Human Services

505 Deaderick Street • Nashville, TN 37243-1403 • Tel: 615-000-1234 • Fax: 615-000-1234 • tn.gov/humanservices